




KNOW YOUR RIGHTS

While Traveling

KOOBAN

- Maamulka Ammaanka Gadiidka (TSA) iyo Waaxda Socdaalka ee Xuduudaha (CBP) kuguma soo bar-tilmaameedsan karaan baadhitan iyo su'aalo dheeraad ah oo ku salaysan diin, isir, amase dabagal qawmiyadeed.
- CBP waxa ay qolof ahaan u qaadan kartaa alaabtaadaa elektarooniga ah, laakiin kuguma khasbi karaan inaad furto. Wuxa jira xasad sheegaya inta macluumaad ah ee CBP baadhi karto. La xidhiidh CAIR wixii macluumaad dheeraad ah.
- Muwaadiniinta Maraykanka looma diidi karo inay dalka soo galaan hadii ay diidaan inay ka jawabaan su'aalaha. Has ahaatee, jawaab diidistu waxay keenaysaa dib dhac.
- Dadka haysta Kaadhka Cagaaran (Green Card) looma diidi karo inay dalka soo galaan iyadoo safarkoodu aunu gaabonya bilaa danbina ahayn maahee sida uu sheegayo sharciga USC 1101(a)(4). Has ahaatee, jawaab diidistu waxay keenaysaa dib dhac.
- Ajaanibka haysta dalku gal waa loo diidi karaa inay dalka soo galaan hadii ay diidaan inay hogaansamaaan. La hadal abukaate intaanad ka bixin dalkaaga.
- La xidhiidh CAIR si aad u soo sheegto caga-julayn ama takoorid aad la kulantay intad socdaalaysay.



MACLUUMAADKANI MAAHA IN LOO TIXGELIYO TALO SHARCI.



WWW.CAIR.COM

KNOW YOUR RIGHTS

While Traveling



Council on American-Islamic Relations

BAADHAYAASHA MAAMULKA AMMAANKA GAADIIDKU (TSA) AWOOD UMA LAHA IN AY:

- + Kugu soo bar-tilmaameedsadan baadhitaano dheeraad ah ama su'aalo iyaga oo ku salaynaya diintaada, isir ama dabagal qowmiyadeed.
- + Ku waydiyaan su'aalo guud, iyada oo aan la hayn macluumaad la isku hallayn karo, taas oo u horseedaysa iyaga inay aaminaan inaad sharci jebisay. Tusaale ahaan, kuma waydiin karaan noloshaada shaqsiga ah, meesha aad waqtii ku qaadato, ka shaqayso ama ku cibaad daysato.
- + Gacmaha kaa xidhaan ama dharka kaa siibaan si ay kuu baadhaan.

WAAXDA SOCDAALKA XUDUUDUHU (CBP) WAXAY AWOODDA INAY:

- + Ku waydiiso:
 - Dhalashadaada/muwaadin madaada
 - Nooca iyo ujeedadda safarkaaga
 - Wax kasta oo aad kula soo laabanayo Maraykanka kaas oo aanad sidan markii aad ka tagtay.
- + Ay baadho shandadaada iyo waxkasta oo ku jira.
- + Inay qolof ahaan kaaga qaadi karaan qalabkaaga elektarooniga ah, laakiin kuguma qasbi karaan inaad furto. Waa jira xedad sheegaya inta macluumaad ah ee Waaxda Socdaalka Xuduuduhu (CBP) baadhi karaan. Macluumad dheeraad ah karaadso cutubka CAIR ee gudaha.

WAAXDA SOCDAALKA XUDUUDUHU (CBP) AWOOD UMA LAHA INAY:

- + Kugu soo bar-tilmaameedsadan baadhitaano dheeraad ah ama su'aalo iyaga oo ku salaynaya diintaada, isir ama dabagal qowmiyadeed.
- + Ku waydiyaan su'aalo guud, iyada oo aan la hayn macluumaad la isku hallayn karo, taas oo u horseedaysa iyaga inay aaminaan inaad sharci jebisay.. Tusaale ahaan, kum waydiin karaan noloshaada shaqsiga ah, meesha aad waqtii ku qaadato, ka shaqayso ama ku cibaad daysato.

SIDEE BAY WAXA DHACA MARKAAD AAD ISTICMAASHO XUQUUQDAADA AAMUSNAANTA EE XUDUUDAHU U SAAMAYNAYSAAN XAALADDAADA MAGAN-GALYO DOON?

- + Muwaadiniinta Maraykanka looguma diidi karo inay dalka soo galaan diidistooda inay su'aalo ka jawaaban. Ka aamusidaada su'aaluhu waxay kugu sababi kartaa dib u dhac.
- + Dadka haysta Kaardhka Cagaaran (Green Card) looma diidi karo gelista dalka iyado oo safarkoodu aanu gaabnayn ama bilaa danbi ahayn maahane, marka loo eego qodobka sharciga USC 1101(a)(14). Si kastaba ha ahaate, su'aalo ka aamusku wuxu keeni karaa dib u dhac.
- + Ajaaanibka dalku galka haysta waa loo diidi karaa gelista dalka hadii ay hogaansami waayaan. La xidhiidh sharciyaqaan ka hor intaanad waddanka ka bixin.

Rakaab diyaaradeed ahaan, Waa aad xaq u leedahay in ay shaqaalaha diyaaradda iyo amniguba kuula dhaqmaan si xushmad iyo karaamo leh. Waa aad xaq u leedahay inaad cabasho ka gudbiso dhaqanka aad u aragto takoorid. Hadii aad rumaysantahay in si takoorid ah laguula dhaqmay , si degdeg ah:

- + U waydiiso magacyada iyo aqoonsiga dhammaan shaqsiyaadka ku lug leh dhacdada. Hubi inaad macluumaadkan qorto.
- + Dalbo inaad la hadasho kormeeraha goobta.
- + Waydii bal in dadka lagaaga soo saaray sababtoo ah magacaaga, muuqaalkaaga, labbiskaaga, isirkaaga, qowmiyadaada, diintaada ama meesha aad ka soo jeedo dhalasho ahaan.
- + Waydiiso qof markhaati ah inuu kuu qoro magaciisa iyo meesha lagala soo xidhiidhayo.
- + Qor waraaqda xaqiqida isla marka dhacdadu dhacday ka dib. Hubi inaad qorto numberka duulimaadka, taariikhda duulimaadka iyo magaca shirkadda diyaaradda.
- + La xidhiidh Golaha Xidhiidhka Islaamka ee Maraykanka (CAIR) si aad u soo gudbiso cabasho.
- + Duuliyaha diyaaraddu wuu diidi karaa inuu qaado qof rakaab ah hadii uu si macquul ah u rumaysan yahay marka uu firsho in qofkaasi khatar ku yahay ammaanka duulimaadka. Duuliyuhu, si kastaba ha ahaatee, kuma warsan karo ama kuuma diidi karo in aad raacdo diyaaradda sababo la xidhiidha takoor ay ka mid yihiin diin, halka aad dhalasho ahaan ka soo jeeddo, Jinsi, qawmiyad amase siyaasadda aad aaminsan tahay.

